Somali

Housing Benefit and Council Tax Benefit – a guide to fraud and how we can prevent it
Macaashka Guryeynta iyo Macaashka Canshuurta Degmada – hage sida loo qiyaamo iyo sida aan isu hor-istaagi karno

Qoraalkaan wuxuu sharxaayaa waxa qiyaameynta Macaashka Guryeynta iyo Macaashka Canshuurta Degmada uu yahay iyo sida aan u wada shaqeyn karno si aan qiyaamadaa u hor is-taagno. Qawaaniinta waa isku mid meel walboo aad ku nooshahay. Haddii aad aqoonin guddigee qaabilsan deegaanka gurigaada ku yaal, waxaad akhbaartaan ka heli kartaa oo ay ku qoran tahay warqadda biilka canshuurta degmada.

What is Housing Benefit and Council Tax Benefit fraud?

Maxay tahay qiyaameynta Macaashka Guryeynta iyo Macaashka Canshuurta Degmada?

Qiyaameynta macaash waa marka qof uu sameeyo codsi macaash ee ku salleysan akhbaar uu og yahay in ay been tahay ama sax ahayn. Codsigu wuxuu qiyaameyn noqon karaa haddii qofka codsanaaya macaashka uu noo sheegin isbeddelka xaaladahiisa taasoo dhimi lahayd qadarka macaash uu xaq u leeyahay. Marmar, qofka codsanaaya macaashka ayaa mas'uul ka ah qiyaameynta macaashka, marmarna milkiilaha guriga, shaqo-bixiyaha, wakiil ama qof kale kaasoo caawiya buuxinta foomka macaashka ayaa laga yaabaa inuu qofkaa ku caawiyey.

Qiyaameynta Macaash waa fal dembi (kiriminaal). Haddii ay nala noqoto in qof macaashka uu codsanaayo inuu xaq u lahayn, kooxdeenna caaboon ayaa baari doonta qofkaa. Haddii aan caddeyn helno taasoo tibaaxeysa inuu qofkaa ku kacaayo qiyaamo, waxaa laga yaabaa inaan maxkamadeyno ee uu bixiyo ganaax ama aan u jarno digniin rasmi ah ee lagu magacaabo 'caution'. Xaald walbaba, waxaan fiiri doonnaa inaan dib uga codsanno qadarka guud ee macaash ee sida dheeraadka ah loo bixiyey. Xaalado cayiman, waxaa laga yaabaa inaan xataa la wareegno lacagaha kale ama hantida haddii aan aamminno in ay yihiin kuwo ka dhashay dembigaa.

Why is it important to stop Housing Benefit and Council Tax Benefit fraud?

Maxay muhiim u tahay joojinta qiyaameynta Macaashka Guryeynta iyo Canshuurta Degmada?

Qiyaameynta Macaash waxay canshuur bixiyayaasha ugu kacdaa qiyaastii £2 billion sannad walba. Tan waa lacag lagu kharash-gareyn lahaa howlo kale oo muhiim ah. Qiyaameynta waxay saameyneysaa inta lacag ee canshuur degmo iyo canshuur dakhli ee ay tahay inaad bixiso iyo heerka ilo ee la heli karo ee bulshada dhexdeeda ay wadaageyso.

Waxaa na saaran waajib in laga difaaco kharashyada macaash qiyaamo iyo carqaladeyn. Waxaa kaloo na saaran waajib inaan baarno qiyaameyn iyo tallaabooyinka dowladda sida wanaagsan ee aan arrintaan u sameyneyno.

What is being done to help stop fraud in benefit claims?
Waxa la sameeyey si loo joojiyo qiyaameyn marka codsi macaash la sameynaayo?

Kooxdeenna Baaridda Qiyaameynta waxay si sokeeya ah ula shaqeysaa hey'adaha si loo yareeyo qiyaameynta macaashka. Waxay si wadajir ah ula sameeyaan baaritaanno Department for Work and Pensions iyo xukuumadaha deriska (neighbouring councils).; baaritaannanadana waxaa badanaa ka mid ah boliiska, Hey'adda Xuduudaha (the Border Agency) iyo HM Revenue & Customs.

Waxaa nalaga qeyb geliyey 'leyliyada isku-aadinta macluumaadka', taasoo badanaa ay sameyso Hey'adda Isku-aadinta Macaashka Guryeynta iyo Guddiga Qaranka Talada ee Qaabeynta Qiyaameynta – uu ku jiro Guddiga Scotland ee Scotland, kaasoo hubiya akhbaarta ay haayaan xukuumadaha dadweynaha iyo kambaniyada shakhsiga qaarkood. Akhbaar kastoo aan isku aadisneyn waxaa loo gudbiyaa xukuumadda qaabilsan si ay u baarto.

Waxaan baarnaa eedeymaha qiyaameyn macaash oo dhan. Haddii baaritaanadeenna ay muujiyaan in qof uu sameynaayo qiyaamo, waxaan tixgelinnaa sidii aan u maxkamadeyn lahayn ama aan tallaabo ugu qaadi lahayn qofkaa ama dadka ay khuseyso, iyadoo taa ay ku xeran tahay xaaldahooda shakhsiyadeed iyo sida uu kiiska u culus yahay. Go'aannadeenna waxay ku jaan-go'an yihiin siyaasaddeenna Cunaqabateynta Qiyaameyn Macaash.

What types of Housing Benefit and Council Tax Benefit fraud are there?
Waa noocyadee qiyaameynta Macaash Guryeyn iyo Macaash Canshuur?

Kuwa soo socda waa noocyada qiyaameynta codsiyada.

- **Dadka aan noo sheegin in lammaane, qaraabo, saaxiib ama la-deggene uu la nool yahay ama uu ka guuray guriga**

Haddii qof noo sheegin in qof kale uu guriga kula nool yahay ama uu guriga ka guuray, tan waa qiyaameyn maadaama ay saameyn ku yeelaneyso xuquuqdooda macaash.

- **Dadka aan noo sheegin in ay shaqeeyaan, inta saacadood ay shaqeeyaan ama inta lacag ee ay qaataan**

Waa qiyaameyn haddii qof codsanaaya macaash uu noo sheegin in uu shaqeeyo markaa oo uu xaq u lahayn macaashyada sida Lacagta Shaqa-doonayaasha (Jobseeker's Allowance) ama Dakhliga Taakuleynta (Income Support). Waxay kaloo noqon kartaa in ay shaqeeyaan saacado dheeri ah ama ay qaataan ka badan inta ay noo sheegeen.

- **Dadka aan noo sheegin lacagta dhigaalkooda iyo maalgelintooda**

Tan waa marka qof uu noo sheegin xisaabta bankiyadooda oo dhan ama building society, lacagta caddaanka, suuqyada iyo saamiga iyo noocyada kale ee dhigaal, maadaama ay tan saameyneyso xaqooda macaash.

- **Dadka aan noo sheegin guryaha ay leeyihiin, ha ahaado UK dhexdeeda ama dibaddeeda**

Qiyaameyntaan waa marka qof macaash codsanaaya uu noo sheegin guri ama dhul uu leeyahay (kaasoo ay ijaar ka qaataan).

- **Dad ku codsanaaya macaash cinwaan (guri) ay qeyb ahaan u ijaareen ama ay ku nooleyn**

Tan waa marka qof uu codsanaayo macaash guri ay deggeneyn ama qeyb ahaan ay qof kale uga ijaareen. Waxay kaloo ay noqon kartaa marka qof uu u codsanaayo macaash guri aan jirin ama marka laga yaabo in ay tahay in ay ijaar bixinin. Noocaan qiyaameynta wuxuu dhici karaa marka uu caawinaayo ee uu ka qeyb qaadanaayo milkiilaha ama ijaartayaasha kale.

- **Dadka sii wada codsiga macaash guri marka ay ka guureen ka dib**

Haddii qof uu noo sheegin in uu guuray, laakin uu sii wado inuu qaato lacagta Macaashka Guryeynta ee gurigiisii hore,waxay sameynaayaa qiyaameyn.

- **Dadka aan na siin akhbaartooda dakhli oo dhan**

Tan waa marka qofka codsanaaya macaashka uu noo sheegin akhbaartiisa dakhli ama isbeddelka qadarka lacag ee uu helo, maadaama tan ay saameyneyso xaqa uu u leeyihay macaash. Dakhli waxaa ku jira hawlgabka (ha ahaato shaqo ama hawlgab shakhsi), lacag canshuur (tax credits), deyn arday (student loans), lacag siin ama deeq.

- **Dadka aan noo sheegin in iyaga, aabbaha carruurtooda ama qaraabo ay leeyihiin guriga ay u codsanaayaan Macaash Guryeyn**

Ma bixin karno Macaash Guryeyn haddii guriga uu leeyahay qofka sameynaaya codsiga, ama aabbaha canug ka mid ah carruurta. Marka qiyaamada noocaan ah waa marka qofka codsanaaya mid ka mid ah uu ku guuldarreysto inuu noo sheego inuu leeyahay guri ama uu noo sheegin runta ah cidda guriga leh. Tan waxay kaloo ay khuseysaa xaalado qaarkood haddii qaraabada qofka codsiga sameynaaya uu guriga leeyahay.

I think I know someone who is committing benefit fraud – what should I do?

Waxaan u maleynaayaa inaan ogahay qof sameynaaya qiyaamo macaash – maxaan sameeyaa?

Aad ayey muhiim u tahay inaad noo sheegto. Haddii aad tuhunto in qof uu sameynaayo qiyaamo macaash waxaan dooneynaa inaan war adiga kaa maqalno.

- Waxaad la xiriiri kartaa degmada deegaankaada- local council- (waxaad magaca degmada deegaankaada aad ka heli kartaa warqadda biilka canshuurta degmada- council tax bill).

- Waxaad ka soo wici kartaa taleefanka lacag la'aanta ee the National Benefit Fraud Hotline Freephone 0800 328 6340 ama
0800 854440 ama 0800 678 3722 dadka ku hadla Welsh.

- Waxaad foomka ka buuxin kartaa internetka cinwaanka www.secure.dwp.gov.uk/benefitfraud/.

What information do I need to give?
Akhbaartee ayaan u baahanahay inaan bixiyo?

Sharcigu wuxuu leeyahay in ay jirto sabab wanaagsan si qof looga baaro qiyaamo macaash ─ marka waxaad u baahan tahay inaad bixiso sida ugu badan ee macquulka ah akhbaarta soo socota.

- Magaca dadka aad aaminsan tahay in ay ku kacaayaan qiyaamo macaash
- Cinwaankooda
- Akhbaarta cid kastoo kale ee arrintaa ku jirta
- Astaanta dadka arrintaa ku jira, sida dhererkooda, hab-dhismeedkooda iyo midabka tintooda
- Astaanta baabuurkooda, uu ku jira numbarka gaariga iyo midabka
- Sababta aad u tuhuntay qiyaamo iyo waxa aad aaminsan tahay in ay dadkaa sameynaayaan
- Tafaasiisha shaqo kastoo ay dadkaa qabtaan, ay ku jirto nooca shaqada, magaca iyo cinwaanka cidda ay u shaqeeyaan, saacadaha ay shaqeeyaan iyo inta lacag ee ay qaataan
- Tafaasiisha lammaanayaal kasta ee laga yaabo in aan naloo sheegin, ay ku jirto magacyadooda, astaantooda, shaqadooda, iyo waqtiga ay guriga soo galaan iyo waqtiga ay ka baxaan
- Tafaasiishooda iyagoo lacag badan kharash-gareynaayaan, taasoo aad ka fileynin qof qaata macaash

Do I have to give my name?

Magaceyga ma inaan bixiyaa?

Waxaad dooran kartaa in tafaasiishaada xiriirka aad dhiibin haddii aad doorbideysid, laakin waa na caawineysaa haddii aad noo sheegtid cidda aad tahay si aan u awoodno inaan kuula soo xiriirno haddii aan su'aalo qabno.

What happens with the information I give?

Maxaa ku dhacaaya akhbaarta aan bixiyo?

Kooxdeenna Baaritaanka Qiyaamo ayaa fiirin doonta akhbaarta aad bixiso. Waxayna ka dhigi doonaan akhbaarta mid sir ah.

Haddii ay akhbaarta tahay mid ku filan, waxay hubin doonaan codsiga macaashka qofka. Baaritanka waxaa laga yaabaa inuu qaato waqti, markaa ka dib kooxda ma kuu sheegi karaan waxa ay ogaadeen ee ka dhashay akhbaarta aad bixisay.

What action will you take?

Tallaabadee ayaad qaadi doontaan?

Marmarka qaarkood ma qaadeyno wax tallaabo ah maadaama laga yaabo in qofku uu sameyneynin qiyaamo macaash. Tusaale, waxaa dhici karta in qofku uu horey noogu sheegay inuu shaqeeyo laakin tan ay saameynin macaashkiisa. Macaashka Guryeynta iyo Macaashka Degmada waxaa la siin karaa dadka shaqeeya laakin ay soo gasho dakhli hoose.

Oo keli ah waxaan tallaabo qaadeynaa haddii aan ogaanno in qofku uu sameynaayo qiyaamo macaash. Talaabada waxaa ku jiri kara joojinta macaashyada qofka, in ay bixiyaan ganaax, iyo in maxkamad lala tiigsado, taasoo horseedi karta xukun ah xabsi.

Where can I get more advice?

Xaggee ayaan ka heli karaa talo dheeraad ah?
Haddii aad u baahan tahay caawin dheeraad ah ama talo, nala soo xiriir. Waxaad tafaasiisha xiriirka warqadda biilkaada canshuurta degmada ama buugga taleefanka ee deegaankaada (your local phone book).

National Fraud Hotline

Warqad u soo qor:
National Fraud Hotline
PO Box 647
Preston
PR1 1WA.

Taleefan lacag la'aan ah (Freephone): 0800 328 6340

Websayt: www.targetingfraud.gov.uk

Independent advice
Talo madaxbannaan
Haddii aad u baahan tahay talo madaxbannaan, la xiriir citizens advice bureau-ga deegaankaada. Waxaad taleefankooda iyo hey'adaha kale ee la-talinta aad ka heli kartaa deegaanka buugga taleefanka deegaankaada, maktabadda deegaankaada ama inaad nala soo xiriirtid.

Other formats
Hababka kale
Waxaad akhbaarta xayeysiintaan ku heli kartaa hab daabacaad ballaaran, qoraalka dadka aragga liita iyo iyadoo ah luqado kale. Waxaa kaloo jira hab maqal internetka.
Ka booqo webestaydkeenna www.benefit-leaflets.org wixii akhbaar dheeri ah.